

### Waa maxay College Bound?

collegebound.wa.gov collegebound@wsac.wa.gov 888.535.0747 (doorashada 1)



Ardayda dugsiga dhexe: Ma xiiseynaysaa daryeelka caafimaadka? Dhismaha? Naqshada ciyaarta muuqaalka ah? Maaraynta Ganacsiga? Nooc kasta oo higsiyadaada xirfadu yihiin ba, College Bound waxa ay kaa caawin kartaa in aad ka gasho iskana bixiso qarashka dugsiga kugu haboon! College Bound waa ballan-qaad hore oo ah kaalmada maaliyadeed ee gobolka, ida Washington College Grant, ee ardayda xaqa u leh ee buuxinaysa ballan-qaadka College Bound. College Bound waxa ay dabooshaa kharashka dhexdhexaad ka ah ee waxbarashada (xaddiga kuleejyada dawladda), fiiga, iyo xaddi yar oo buugaagta ah. in ka badan 65 kuleej, jaamacado, iyo dugsiyo farsamo oo ku yaal Washington. Ma waxa aad tahay College Bound?

#### Miyaan u qalmaa deeqda?

Ardayda buuxsha mid kamid ah shuruudaha soo socda ayaa si otomaatig ah looga diiwaan gelin doonaa barnaamijka College Bound:

- Waxaad dhigataa dugsi dawladeed waxaadna iska diiwaangalisay FRPL (Free and Reduced-Price Lunch, Qadada Bilaashka ah ama Qiimaha Jaban) ee ardayda fasalka 7aad, 8aad, ama ardayda cusub ee u qalma ee fasalka 9aad.
- Aad ku jirto daryeelka ilmaha ee dawlada, ama aad tahay qof dawladu biisho, dhigtana inta u dhexaysa fasalka 7aad iyo qalin jabinta dugsiga sare.

#### 2024-25 tilmaamaha dakhliga

Tirada Qoyska	Dakhliga Sannadlaha ah <sup>1</sup>	Dakhliga Billaha ah	Dakhliga Asbuuclaha ah
2	\$37,814	\$3,152	\$728
3	\$47,767	\$3,981	\$919
4	\$57,720	\$4,810	\$1,110
5	\$67,673	\$5,640	\$1,302
6	\$77,626	\$6,469	\$1,493
Xubno	Ku dar	Ku dar	Ku dar
Dheeraad ah <sup>2</sup>	\$9,953	\$830	\$192

<sup>&</sup>lt;sup>1</sup> Dakhliga qoyska waa inuu ka yaraado ama u dhigmaa cadadkaan.

#### Qaababka kale ee loogu qalmo

Ardayda qaar ayaa aan buuxin labada shardi midkoodna laakiin waxay xiisaynayaan inay codsadaan College Bound. La xariir barnaamijka si aad u codsato haddii aad:

- Dhigato dugsi gaar loo leeyahay ama barnaamijka waxbarashada guriga ee Washington aadna buuxiso shuruudaha dakhliga.
- Aad ku jirto nooc kale oo daryeelka dawlada ah aadana u qalmin FRPL.

Haddii aad u qalanto FRPL, iska qor dugsigaaga kadibna si otomaatig ah ayaa lagaaga qorayaa barnaamijka Kuleej Aadka!

#### Waa maxay balan-qaadku?

 Haddii aad damacsan tahay inaad gasho kuleej afar sano ah isla marka aad dugsiga sare ka baxdo, waa inaad ka qalinjabisaa dugsi sare oo Washington ku yaal ama barnaamijka dugsiga guriga oo heshaa GPA with GPA (Grade Point Average, Celceliska Dhibcaha Darajada) isku-darka 2.0 ama ka wanaagsan.

Ma jiraan wax shuruudo GPA-ga dugsiga sare ahi, haddii aad qorshaynayso inaad gasho kuleej bulsho ama dugsi farsamo.

- Ka codso kaalmada maaliyadeed FAFSA (Free Application for Federal Student Aid, Codsiga bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka) ama WAFSA (Washington Application for State Financial Aid, Codsiga Washington ee Gargaarka Dhaqaale ee Gobolka) sanadkaaga u danbeeya ee dugsiga sare iyo sannad kasta inta lagu jiro kuleejka ama tababarka.
- Waa inuusan gelin wax danbi ah.

# Sidee ayaan ku ogaanayaa inaan ahay ardayda College Bound ah?

Waxaad heli dontaa shahaadada College Bound oo laguugu soo diraayo boostada. Haddii aad guurto ama beddesho macluumaadkaaga xidhiidhka, hubi inaad nala socodsiiso si aad u hesho macluumaadka iyo wararka muhiimka ah.

## Sidee ayaan u heli doonaa lacagta College Bound?

- Buuxi shuruudaha balanqaadka iyo shuruudaha degenaanshaha gobolka.
- Dirso codsiga deeqda dhaqaalaha intaad ku jirto sanadka ugu danbeeya ee dugsiga sare iyo sanad kasta oo aad kuleejka ku jirto. Kuleejkaaga ayaa go'aansan doona in aad buuxisay shuruudaha dakhliga.
- In lagaa aqbalo aadna ka xaadirto dugsi u qalma—waxa jira in ka badan 65!
- Ku lahaw sumcad wanaagsan kuleejkaaga.

College Bound waa barnaamij ay maalgaliso gobolku ayna maamulaan College Bound waa barnaamij ay maalgaliso gobolku ayna maamulaan Washington Student Achievement Council.

<sup>&</sup>lt;sup>2</sup> Xubin kasta oo dheeraad ah oo kamid ah qoyska, kudar cadadka lacaqta qofkii.